

WARQADA KA RAALLI NOQOSHADA SI LOO BAARO INJIRTA MADAXA

Ogolaanshaha in la sameeyo waqtiga lagu jiro dugsiga:

(insert school details)

Inta lagu jiro xilliga ilmahaagu wax baranayo, dugsigu wuxuu qabanqaabinayaa in ardada laga baaro injirta madaxa.

Maaraynta infakshanka injirta madaxa waa lagu guulaysan karaa marka dhamaan carruurta ay ka qaybgalaan barnaamijka ayaga injir baarida.

Dugsigu waa la socdaa in arrintaani tahay mid xasaasi ah waxaana la ilaalinayaa sirta ardayga si looga fogaado in taasi ilmaha meel ka dhac u keento ama ku noqoto.

Baariitaanka ardada waxaa samaynaya qof tababaran oo uu ansixiyey maamuluhu ama golaha dugsiga.

Intaan la bilaabin baariitaanka, qofka baariitaanka samaynaya ayaa u sharxaya dhamaan ardada in ku jirida injirta madaxa aanay macneheedu ahayn inuu madaxaasi ka nadaafad xun yahay madaxyada kale. Waxaa kaloo la cadaynayaa in injirta madaxu ay noqon karto mid cuncun leh kuna dhibayso haddii aad ogtahay inaad qabtana, waxbaad ka qaban kartaa arrintaas.

Qofka qaadaya baariitaanka ayaa si taxadar leh u eegi doona ilmaha madaxiisa haddii wax injir ah ama ukunteedu ku jirto.

Qofka dugsigu idmay ayaa fiirin doona qofka injirto ku jirto madaxiisa, marka laga shakiyo in injiri ku jirto. Ma taaban doonaan ilmaha madaxiisa intay baariitaanka fiirinta wadaan.

Kaysaska laga hello injirta madaxa, qofka baaraya ardayga ayaa u sheegi doona macalinka ardayga iyo maamulaha (ama qof kale haddii loo baahdo). Dugsiga ayaa la samayn doona xiriirka ku haboon waalidka/daryeelaha/masuulka.

Fadlan ogsoonow in shuruucda caafimaadku u baahan tahay marka ilmaha laga hello injirta madaxa, in aan ilmuhu ku soo noqon inta daawada ku haboon la bilaabayo. Dugsiga ayaa laga yaabaa inuu codsado dhamaystirka “foomka ficilka la qaadayo” kaas oo u baahan in waalidka/masuulka/daryeelayaashu magacaabaan haddii iyo marka daawadu bilaabatay.

Magaca waalidka/masuulka/daryeelaha oo buuxa:.....

Magaca waalidka/masuulka/daryeelaha oo buuxa:.....

Cinwaanka:..... Post code:.....

Magaca dugsiga ilmuhu tago:.....

Waxaan halkan ku bixinayaa ogolaanshaha in ilmaha kor ku magacaabani ka qaybgalo barnaamijka injir baarida waqtiga dugsiga wax laga baranayo.

Saxiixa waalidka/masuulka/daryeellaha: Taariikh.....

Saxiixa waalidka/masuulka/daryeellaha: Taariikh.....

Fadlan u sheeg dugsiga haddii masuuliyada/haynta ilmahaagu isbedeshay, maadaama foomkaani u baahan yahay in dib loo saxiixo haddii isbedel jiro. Fadlan dugsiga qoraal ahaan ugu sheeg haddii aadan doonayn in aadan ka raali ka noqosho dambe bixin si dugsigu u sameeyo baariitaanka injirta ee ilmahaaga.